



SOMALILAND FORUM

Ururka Somaliland Forum: War-saxaaafadeed

"Xukunka ay Guddida Nabadgalyada Saaxil ku riddey lixda muwaadin waa xaq darro, waana in maxkamadda sharciga ah la horkeeno ama la sii daayo"

Sumad: SF/CLC/06/11

Taariikh: 03/12/2006

Ururka Somaliland Forum ee ay isku-bahaysteen qurba-joog u dhashay Somaliland waxa uu si aada u uga soo horjeeda xukunka sharcidarrada ah ee ay Guddida Nabadgalyada Gobolka Saaxil ku rideen lix ka mid ah dadkii loo qabqabtay mudaharaadkii ka dhacay magaalada Berbera 16-kii bisha Noofember, 2006.

Ururku waxa uu marar badan ku celceliyay oo ugu baaqay xukuumadda iyo goleyaasha qarankaba in si degdeg ah loo baabi'iyo jiritaanka guddiyada nabadgalyada ee sida sharci darrada ah uga hawlgala gobolada iyo degmooyinka dalka.

Urur ahaana annagoo soo dhawaynayna go'aankii ay guddida turxaan bixinta labada gole ku gaadheen magaalada Sheekh ee farayay in Guddiyada Nabadgalyadu ay ku dhaqmaan Xeerkii Nabadgalyada Guud ee 1962kii, kaasi oo aan Guddiyadda awood u siinayn in ay xabsi ku xukumaan muwaadiniinta, ayaa waxa haddana fajiciso nagu noqotay in ay guddiyadaasi ka tallaabsadaan wixii labada gole ku heshiiyeen oo ay xadhig aan sharciga waafaqsanayn ku rideen dad, iyada oo aan maxkamad sharci (court of law) ah la horkeenin, taas oo ah in durba la jabiyo wixii lagu heshiiyay.

Somaliland Forum waxay uu u arkaa in falalka noocan oo kale ahi in ay ku xadgudbayaan xuquuqda aasaaska ah ee muwaadinka, iyada oo ay waliba falalkaasi caqabad ku noqonayaan hannaanka dimuqraadiyadeed ee dalka, isla markaana ay dhabarjabinayaalololaha aynu ugu jirno aqoonsi caalami ah oo dalkeenu helo.

Haddaba waxaanu ugu baaqaynaa Gollayaasha qaranka iyo asxaabta qaranku:

- 1) In si degdeg ah loo fuliyo dhaqan geliyo heshiiskii Sheekh ee farayay in Guddiyada Nabadgalyadu in ay ku dhaqmaan Xeerkii Xasilloonida Guud (Public Order Law) ee 1963kii oo aan awood u siineyn ay xukun ku ridaan cidna oo qofkii dambi gala la horgeeyo maxkamad.
- 2) In aan hay'adaha garsoorka hawshooda lagu faragelin, lana ogado in ay yihiin kuwa kaliya ee xukun ridi kara.
- 3) In ay Dowladdu xil weyn iska saartaa dhawridda xuquuqda insaanka iskana ilaaliso wixii dhaawacaya sumcadda dalka, si deg deg ah u dhisto Komishan madax banaan oo

Xuquuqda aadimiga ah ka shaqeysa (Somaliland Human Rights Commission), iyadoo kaalmo iyo deeq lagu dhiso loo heli karo.

4) In si dhakhso ah loo sii daayo ama maxkamadda sharciga ah la horkeeno cid allaale cidii hadda u xidhan amar Gudi Nabadvelyo soo saartay.

5) In Gudoomiyaha Maxkamda Sare uu soo wareegto uu ku amrayo in Maxkamaddii loso bandhigo in qof u xidhanyahay Gudi Nabadvelyo ay amar ku bixiso in la horkeeno qofkaas iyadoo cuskanaysa Qodobada 66aad (habeas corpus) ama 67aad ee Xeerka Habka Ciqaabta.

6) In Wasiirka Arrimaha Guduuhu dib u habeeyo Gudiyadda Nabadvelyadda oo amar cadaana ugu sheego in ay ku dhaqmaan Distoorka JSL oo anay faragelin awoodah waaxda garsoorka.

7) In Dawladdu ay horkeento Gaha Wakiilada xeer cusub oo casri ah oo beddela Xeerka Xasilloonida Guud (Public Order Law) 1963kii oo horena uga hadleyn Wakiiladu.

Sida distoorka qaranka iyo Xeerka Habka Ciqaabta ku qeexan, ma bannaana in qofna la baadho, la xidho ama la xayiro, haddii aan sharciga loo marin. Nafta Aadamuhuna waa deeq, waana qaali, qofkastaana waxa uu xaq u leeyahay xorriyadiisa, waxaanu taas ku waayi karaa oo qudha xukun maxkamadeed.

SOMALILAND FORUM

Ururka Somaliland Forum waa urur madaxbannaan oo ay isku bahaysteen qurb-joog reer Somaliland ahi. Waxa uu ururkani aaminsan yahay qarannimada, horumarka iyo madaxbannaanida Somaliland, waxanu iskaashi la sameeyaa jaalliyadaha Somaliland ee dalka dibaddiisa ku dhaqan iyo waliba ciddii kale ee danaysa horumarka Somaliland. Ururkani wuxu rumaysanyahay in dadka reer Somaliland ee dibaduhu ay door ka ciyari karaan horumarinta dalkooda.

1. Chairman: Mohammed Ali Baranbaro - USA , Chairman@somalilandforum.com
2. Vice Chair: Ahmed Mohamed Jibril - Finland
3. Secretary: Hogad Ahmed Farah - USA
4. Treasurer: Amina Abdi Jama - Canada
5. Member at Large: Nuura Ahmed Waris - USA

Somaliland Forum Website: <http://www.somalilandforum.org>